# Ogeysiis Wadareedka Hab-dhaqannada Asturnaanta

Notice of Privacy Practices / Somali



Seattle Children's®
HOSPITAL • RESEARCH • FOUNDATION

# Ogeysiis Wadareedka Hab-dhaqannada Asturnaanta

## ee Isbitaalka Carruurta ee Seattle (Seattle Children's Hospital) iyo Adeeg-bixiyaal Kale oo Gaara

Ogeysiiskan wuxuu hirgalay 1/10/18

## SooKoobid

Intaad ka heleysid daryeel Isbitaalka Carruurta ee Seattle, dhaqaatiirta, kalkaalisooyinka, iyo kuwa kalaba, waxay abuuraan oo helaan macluumaad kugu saabsan, taariikhda caafimaadkaaga iyo daaweeyntaada. Tan waxaa loo yaqaanaa "macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka."

Bukaanada ugu badan ee Isbitaalka Carruurta ee Seattle waa carruur. Markaan ogeysiiskaan kaga hadalno "adiga" ama "kaaga" waxaan ka hadleynaa bukaanka. Wax firqiya uma dhexeeyo haddii bukaanku uu yahay ilmo ama qof weyn. Markaan ka hadalno bandhigyada aad hesho, waxaan ka wadnaa bandhigyada bukaanku helo, wakiil sharciyeed ee bukaanka, ama qof loo oggolaaday inuu helo macluumaadkaga bukaanka. Masuul baan ka nahay ilaalinta macluumaadkaaga caafimaad.

Sharcigu wuxuu nagu waajibinayaa in aanu:

- Ilaalinno asturnaanta macluumaadkaaga.
- Ku siinno ogeysiiskaan ku saabsan hab-dhaqannadanada khaaskaa.
- Raacnno hab-dhaqannada asturnaanta ee ku sharraxan ogeysiiskan.
- Kuu wargalinno haddii macluumaadka caafimaadka beesha wax loo dhimay.

Waxaad leedahay xuquuq khaas ah. Waxaad kartaa:

- In aad aragto oo aad hesho nuqullada macluumaadkaaga caafimaad ee bukaan.
- In aad codsato isbeddel ama kudaris ku aadan macluumaadkaaga caafimaad ee bukaan.
- In aad codsato liiska qaababka macluumaadkaaga caafimaad ee bukaan loo bandhigay ama loogu wadaagay debedda Children's
- In aad na weyddiiso qaab kale in aan kuula soo xiriirno.
- In aad codsatid in aanu xadeeyno isticmaalka macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka
- In aad sameyso cabasho ku saabsan asturnaanta macluumaadkaaga caafimaadka bukaan.

Sidoo kale waxaad kartaa:

- In aad naga codsato in aanaan siin magacaaga iyo xaaladdaada caafimaad wacayaasha iyo booqdayaasha muddada joogitaankaaga isbitaal.
- In aad naga codsato macluumaad in aanaan la wadaagin xubnaha qoyska.

Iyada oo la raacayo xeerar khaas ah, waxaan isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka:

- Si lagu fuliyo daaweeyn, hawlgallo daryeel caafimaad ama lagu helo kharash adeeg.
- Si wax lagu baro laguna tababbaro shaqaale iyo arday.
- Si lagu sameeyo daraasad Golaha Muraajacada Nidaamsan ay oggalaadeen.
- Sida sharcigu waajibiyo ama oggolaado, ama si la jirta oggolaanshahaaga qoraal.

Sharcigu wuxuu siiyaa ilaalin dheeraada noocyadaan macluumaadka caafimaad bukaan:

- Macluumaadka cudurada galmada lagu gudbiyo (oo ay ku jiraan HIV/AIDS)
- Xogta daaweynta isticmaal-xumada maandooriyaasha & khamrada
- Xogta Caafimaadka Dhimirka

## Ogeysiiskaan wuxuu sifaynaya sida macluumaadkaaga caafimaad loo isticmaali karo loona bandhigi karo iyo sida aad u heli kartid macluumaadkaan. Fadlan si taxadar leh u akhri.

Ogeysiiskaan wuxuu sifaynaya xuquuqdaada iyo masuuliyaadkaaga si aan u ilaalinno macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka. Wuxuu kuu sheegaya sharciga kaasoo ku siiya ilaalinta macluumaadkaan. Hab-dhaqannada asturnaanta ee Children's wuxuu khuseeyaa dhammaan bukaanada Children's. Ogeysiiskaan wuxuu sharraxayaa sida macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka loo isticmaalo, iyo sida iyo marka la bandhigi karo. Sidoo kale wuxuu kuu sheegaya in aanu beddeli karno ogeysiiskaan iyo sida aad wax uga ogaan kartid isbedellada.

## Adeeg-bixiyaasha daryeelka caafimaad ee ogeysiiskaan ku jira

Children's wuxuu la shaqeeyaa hay'ado kale iyo adeeg-bixiyaal, adeegyo daryeel caafimaad iyo hawlgallo daryeel caafimaad oo kale awgood. Ogeysiiskaan wuxuu ku siinayaa macluumaad ku saabsan isticmaalka iyo bandhigga macluumaadkaaga caafimaadka bukaan ee adeeg-bixiyaashaan:

- Seattle Children's Hospital
- Seattle Cancer Care Alliance
- UW Medicine, oo ku jiraan University of Washington Physicians iyo hay'ado kale oo Jaamacadda
- UW School of Dentistry
- Children's University Medical Group
- Intaa waxaa raacsan, adeeg-bixiyaasha kale waxay oggolaadeen inay raacaan ogeysiiskaan markey daryeel ama adeegyo ka bixiyaan meelaha Children's.

## Children's (Isbitaalka Carruurta)

Children's waxaa ku jira hay'ado kuwaas oo isla shaqeeya wadaagana macluumaadka caafimaadka bukaanka. Markey habboon tahay, Children's wuxuu wadaagaa macluumaadkaaga si uu u baxsho adeegyo daryeel caafimaad, u helo kharashka adeegyadaan, una fuliyo hawlgalyo wadareed oo daryeel caafimaad oo kale. Children's wuxuu ka kooban yahay shaqaalihiisa caafimaad, adeeg-bixiyaal daryeel caafimaad, shaqaale, shaqaale qandaraasley ah, dhaqaatiir tababbar ku jirta, arday iyo falantiir jooga meelaha Children's. Meelahan waxaa ka mid ah:

- Seattle Children's Hospital
- Odessa Brown Children's Clinic
- Children's Bellevue Clinic and Surgery Center
- Children's Outpatient Clinics oo ku yaala Washington, Alaska iyo Montana. Ka arag liiska casriyeysan: www.seattlechildrens.org/clinics-programs/
- Children's Autism Center
- Children's Consulting Nurses
- Children's Home Care Services
- Children's Orthotics & Prosthetics
- Children's Prenatal Diagnosis iyo Treatment Program
- Garfield/NOVA Teen Clinic

# Xaquuqaadkaaga macluumaadka caafimaadka bukaanka

Waxaad xuquuq u leedahay isticmaalka iyo bandhigyada macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka. Waxaad kartaa:

Xaquuqaadkaaga macluumaadka caafimaadka bukaanka:

- Fiiri oo hel nuqulo
- Codso bedel ama ku- daris diiwaankaaga.
- Ogow bandhigyada
- Codso isticmaal xaddidan
- Hel xiriiro qarsoodi ah
- Samee cabashooyin

## In aad fiiriso heshana nuqulada.

Waxaad xaq u leedahay in aad fiiriso ama aad codsato nuqullada diiwaanka caafimaadkaaga illaa ay jiraan ilaalooyin kale oo sharcigu dhigayo mooyaane. Waxaa u baahan doontaa in aad codsigaa qoraal ahaan u sameyso. Waxaa noo sheegi kartaa in aad jeceshay nuqullada diiwaanka in aad ku hesho warqad ahaan ama elektoroonig ahaan. Xaaladaha qaarkood, waxaa dhici karta in lagugu talaco kharashka koobiyenta. Waxaad xaq u leedahay inaad jawaab wakhtiga dhowraysa oo ku salaysan qawaaniinta gobolka iyo kuwa federaalka. Waxaad weyddiisan kartaa inan u gudbinno nuqul cid kale.

## In aad codsato in wax laga beddelo ama lagu daro diiwaankaaga.

Haddii aad u maleyso macluumaad diiwaankaaga ku jira inaysan sax ahayn ama macluumaad muhiima maqanyahay, waxaad xaq u leedahay in aad codsato in aanu macluumaad saxno ama ku darno. Waa in aad codsigaan qoraal ahaan ku sameyso, oo aad u dirto Children’s Privacy Office (Xafiiska Asturnaanta Children’s). Codsigaagu waa inuu sheego sababta bedelka ama wax-ku-darista. Kuma qasbanin inaan aqbalno codsigaaga, laakiin waxaan nuqul codsigaaga ku dari doonaa diiwaanka.

## In aad wax ka ogaatid bandhigyo.

Waxaad xaq u leedahay in aad hesho liiska bandhigyada macluumaadkaaga caafimaadka. Liiskaan kuma jiraan bandhigyada khuseeya daaweeyn, lacag-bixin ama hawlgallo daryeel caafimaad ama bandhigyo aad oggolaatay adigu. Codsigga koobaad ee aad ku dalbato macluumaadkaaga mudo 12 bilood gudahood ah waa lacag la’aan. Waxaad weyddiisigaaga ku hagaajin doontaa Children’s Privacy Office.

## In aad codso isticmaal xaddidan.

Waxaa xaq u leedahay in aad Children’s waydiisato in aanaan shirkadda caymiskaaga wax ka ogeysiin shay ama adeeg haddii aad si buuxda kharashka u bixiso intaanaan dirin biilka. Uga wac Adeegyada Meheradda taleefanka 206-987-5770 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in aad nagaga codsato qoraal ahaan xaddido isticmaalo kale oo gaara iyo bandhigyada macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka. Kuma qasbanin inaan aqbalno codsiyadaan, laakiin waa xurmayneynaa codsi kasta oo aan aqbalno.

## In aad hesho xiriiro qarsoodi ah.

Waxaad xaq u leedahay in aad naga codsato in aanu wax kaaga sheegno arrimaha caafimaad si gaara ama meel gaara. Waa in aad codsigaan qoraal ahaan ku sameysid. Tusaale, waxaa naga codsan kartaa inaan kula soo xiriirno markaad shaqada joogto oo keliya ama boostada oo keliya. Codsigaagu waa inuu noo sheego sida ama meesha aad rabto in lagaalo soo xiriiro.Waa ku wargelin doonaa haddii aan aqbali doono codsigaaga.

## In aad sameeyso cabashooyin.

Haddii aad ka walaacsan tahay in aanu jebinay xog-dhawrkaaga, ama aad nagu khilaafto go’aan aaanu ka sameynay isticmaalka diiwaankaaga, waxaa cabasho la buuxin kartaa Xaafiiska Xog-dhawrka ee Children’s. Children’s kaama aarsan doono buuxinta cabasho xog-dhawr awgeed.

## Sida aan u isticmaalno macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka

Ogeysiiskaan wuxuu khuseeyaa macluumaadka caafimaadka bukaanka laga abuuray ama adeeg-bixiyaasha Children's heleen. Wuxuu caddeyyaa adiga waxayna la xiriirtaa xaaladdaada caafimaadka jirka ama xiska sidey ahayd horaan, hadda ama mustaqbalka. Waxay sidoo kale ku shuqul leedahay daryeelka aad heshid, iyo kharash- bixinta daryeelka xilligii la soo dhaafay, hadda ama mustaqbalkaba. Macluumaadkaan waxaa inta badan laga helaa diiwaanka caafimaadkaaga. Sababaha ugu weyn ee aan u isticmaalno macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka waa in:

- Xirfadleyda caafimaad kuwaasoo caawiya daryeelkaaga ka wada-hadlaan.
- Laga bixiyo diiwaan sharciyeed daryeelka aad hesho.
- Biilal laga diro si markaas aan u heli karno lacag loogu talagay daryeelka aad hesho.
- Adiga iyo lacag-bixiyaha sedexaad aad hubisaan biilkaaga inuu waafaqo adeegyada aad heshay.

Children's wuxuu sidoo kale macluumaad siin karaa:

- Si wax lagu baro xirfadley caafimaad.
- Si lagu taageeero dhaqdhaqaaqyada caafimaadka dadweynaha.
- Si lagu ilaaliyo, lagu cabbiro laguna hormariyo daryeelka aan bixinno iyo natiijooyinka aan gaarno.
- Si lagu bixiyo macluumaad daraasad caafimaad.
- Si hay'adda qorsheyn loogu sameeyo.

Fahmidda diiwaankaaga iyo sida loo isticmaalo macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka wuxuu kugu caawinayaa in aad:

- Hubiso diiwaanku inuu saxyahay.
- Ogaato cidda, waxa, marka, meesha iyo sababta intakale u isticmaasho macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka.
- Sameeyso go'aan wargashan markaad bixineyso idan si aad macluumaad ula wadaagto dadkale.

## Sida aan u isticmaali karno una bandhigi karno macluumaadkaaga oggolaansho la'aantaada

Waa kuwaan tusaalooyin sida aan macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka u isticmaali karno una wadaagi karno oggolaansho la'aantaa:

### Daaweeyn

Waxaan isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka si aan kuu siinno ama kuugu habayno daryeel. Tusaale:

- Dhaqaatiirku waxay u isticmaalaan macluumaadka go'aan-qaadashada sida hadday habboon tahay inay dalbaan baaritaano khaas ah, daaweeyn dabeeci ah iyo daawooyin.
- Kalkaalisooyin, farso-yaqaano ama shaqaale kale waxay u baahan karaan inay ogaadaan kana hadlaan macluumaadkaaga. Waxay u isticmaali karaan daaweeyn- bixin iyo cabbiridda jawaab-celintaada daaweeynta.
- Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga adeeg-bixiyaal kale oo jaalliyadda.

Sida aan u isticmaali karno una bandhigi karno macluumaadkaaga ogolaansho la'aantaada:

- Daaweeyn
- Lacag-bixin
- Hawlgallo daryeel caafimaad
- Tababar
- Daraasad
- Lasoo xiriirkaaga
- Lacag-aruurin
- Dhaqdhaqaaqyo wadareed
- Isdhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka (HIE)
- Asxaab ganacsi
- Isticmaalo iyo bandhigyo kale

## Lacag-bixin (kharash adeeg)

Waxaan isticmaalnaa oo wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaadka bukaanaka si aan u helno lacagta adeegyada daryeelka caafimaadka. Tusaale, haddii aad ku jirtid caymis caafimaad, waxaan si toosa u biilgareynaa caymiska, waxaan ku darnaa macluumaad ku tilmaamaya adiga, baaritaankaaga, adeega aad heshay iyo waxa aan isticmaalnay.

## Hawlgallo daryeel caafimaad

Waxaan u isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka si aan ballan u qabano, u fiirinno una hormarinno adeegyo daryeel caafimaad. Waxaan sidoo kale u isticmaali karnaa cabbiridda waxqabadka shaqaalaha adiga iyo intakalaba daryeelaya. Tusaale, dhaqaatiirka kormeerka waxay fiirin karaan diiwaankaaga bukaan si ay u cabbiraan tayada daryeelka.

## Tababbar

Waxaan isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa macluumaadkaaga si aan shaqaalaha iyo arday wax u barno una tababbarno. Tusaale, dhaqaatiirta waxbara waxay ardayda caafimaad la fiirin karaan macluumaaka caafimaadka bukaanka.

## Daraasad

Waxaan macluumaadkaaga u isticmaali karnaa una wadaagi karnaa daraasad. Guddiga Muraajacada Rismiga (GMR) waxay fiirshaan codsi kasta oo macluumaadkiisa daraasad loo isticmaalayo lana wadaagayo. GMR wuxuu fiirshaan mashruucaad nabad-gal waxayna hubiyaan xuquuda dadka ka qaybqaata daraasadda in la ilaaliyo.

Macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka waxaa dhici karta in loo isticmaalo ama loo wadaago daraasado idan la'aantaada. Tusaale, waxaan karnaa:

- In aanu fiirinno diiwaano caafimaad si aan u eegno dadka kuwaasoo xirta koofiyadaha baaskiilka inay helaan dhaawacyo yar oo madax.
- In aanu macluumaadka caafimaadka bukaanka u isticmaalno go'aan-qaadashada in aan haysano iyo inkale bukaano ku filan daraasad baaritaan kansar.
- In aan ku darno macluumaadka caafimaadka bukaanka nidaamka-xog-aruurinta daraasadda.

Marxaladahaan, GMR waxay marka koobaad go'aansadaan in ay jirto sabab fiican oo lagu isticmaalo macluumaadkaaga idan la'aantaada. Sidoo kale GMRgaa waxay hubiyaan inaan qaadno tilaabooyin lagu xakameynayo isticmaalka macluumaadkaaga. GMRgu waxay u sheegi karaan daraasad-qaadayaasha inay diiwaangeliyaan macluumaadka adiga ku tilmaamaya, hadday u arkaan inay muhiim u tahay daraasadda.

Dhammaan marxaladdaha kale oo dhan, waa in aan helno idankaaga si aan u isticmaalno ama u wadaagno macluumaadkaaga kahor intaadan ka qaybqaadan mashruuc daraasad. Waxaan macluumaadka caafimaadka bukaanka ee kugu saabsan la wadaagi karnaa hay'ado kale idankaaga annakoo haysana, ama haddii GMRgaa oggolaado.

## La soo xiriirkaaga

Macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka waxaa loo isticmaali karaa in lagula soo xiriiro. Tusaale ahaan, waa ku soo wici karnaa ama warqad baan kuu soo diri karnaa si aanu:

- Kuu xasuusinno ballamo
- Kuu siinno natiijooyin baaritaan.
- Kuu wargelinno ikhiyaaraad daaweeyn.
- Kuu wargelinno dhacdooyin waxbarasho caafimaad ama adeegyo.

## Lacag-aruurin

Children's waxaa laga yaabaa inuu Hay'addanada Urur xirfadeedka iyo Deeq-aruurinta la wadaago macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka sida magacaaga, ciwaankaaga, foon-lambarkaaga iyo taariikhaha adeeg. Macluumaadkaan waxaa loo isticmaali karaa in laguula soo xiriiro ayadoo lacag loo aruurinayo hawlgalka daryeelka caafimaad ee Children's. Haddii lacag-aruurin lagula soo xiriiro, waxaa codsan kartaa in aan markale lagu la soo xiriirin. Waa inaan qaddarinaa codsigaaga.

## Dhaqdhaqaaqyo wadareed

Adeeg-bixiyaaasha waxay macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka ku fulin karaan dhaqdhaqaaqyo wadareed ayagoo la isticmaalaya ama la wadaagaya shaqsiyaad ama hay'ado kale si lagu:

- Bixiyo adeegyo daryeel caafimaad.
- Hubiyo in aan helno lacagta adeegyada daryeelka caafimaad.
- Fuliyo hawlgallo daryeel caafimaad wadareed kale. Tusaale, waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka kooxo dhaqaatiir ah iyo dhaqaatiir kale kuwaasoo ka mid ah shaqaalaha Children's, dhaqdhaqaaqyo wadareed awgood.

## Isdhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka (HIE)

Children's ayaa ka qaybqaata isdhaafsiga macluumaadka caafimaadka (HIE). HIE waa nidaam elektaroonig ah oo isbitaallada, dhakhaatiirta iyo daryeel bixiyeyaasha kale ay wadaagaan macluumaadkaaga caafimaad. Ka qaybqaatyaasha HIE ayaa marin ugu heli kara macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka hadba sida lagama maarmaanka ugu ah dawaynta, lacag bixinta iyo hawlaha daryeelka caafimaadka. Waxay kale oo waliba laga yaabaa inay macluumaadkaaga u helaan ficillada wadajirka ah ee lala yeesho shakhsiyaadka ama ururada kale si loo cabbiro tayada iyo horumarka adeegyada.

Macluumaadkaaga caafimaadka ayaa si toos ah loogu daraa HIE. Haddii aad doorato inaadan wadaagin macluumaadkaaga caafimaadka marka loo maro HIE, waa inaad sheegato ama tilmaanto inaadan taas rabin. Si aad wax intaa u dheer aad u ogaatid, booqo www.seattlechildrens.org/HIE ama wac 1-866-987-2000 lambarka gaarka ah (ext.) 7-4444 ama 206-987-4444.

## Asxaab ganacsi

Adeegyadanada qaarkood waxaa bixiya asxaab ganacsi. Waxaan macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka la wadaagi karnaa ayaga si ay shaqooyinkooda u qabtaan. Tusaalooyin xoogaa ah ee asxaabta aan isticmaalno waxaa ka mid ah la-taliyaal maamul, baarayaal, adeegyo diiwaan iyo adeegyo keyd macluumaad. Waxaan ku waajibinaa asxaabta inay saxiixaan qandaraas lagu ilaalinayo macluumaadkaaga.

## Isticmaalo iyo bandhigyo kale

Waxaan ku wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka si lagu hormariyo adeegyada daryeelka caafimaadka, si lagu ilaaliyo nabad-galyada bukaanka iyo caafimaadka dad-weynaha, si lagu hubiyo in aan raacno nidaamka dowladda iyo aqoonsiyada shati, iyo markii kale oo sharcigu oggolaado. Tusaale, waxaan macluumaadka siin karnaa:

- Wakaaladaha kormeerka daryeelka caafimaadka, baaritaan ama shati awgiis.
- Xukuumadaha dowligaa ee cudurada fasaska iyo diiwaanada muhiimkaaga.
- Wakaaladaha dowladda markaan ka shakinno xad-gudub ama dayac.
- Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha si loo hubiyo in aan u hoggaansano Shuruudaha Xeerka Wareejisadka iyo Xisaabtanka Caymiska Caafimaadka (HIPAA)
- Shaqsiyaad u idman si looga fogaado hanjabaad halis ah oo ka dhan ah caafimaadka ama nabad-galyada, ama looga hortago waxyeeleyn halis ah oo ka dhan ah dadkale.

- Hay'ado kuwaasoo ku takhasusay dhaqdhaqaaqyada tabarucaadka xubnaha.
- Hay'adaha sharci-fulinta markii sharcigu waajibiyo ama oggolyahay
- Maxkamado markii la amro, ama dalab-maxkamadeed
- Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka (FDA)
- Barnaamijyada magdhowga shaqaalaha
- Geeri-baarayaasha, baarayaasha caafimaadka iyo agaasimayaasha xabaalaha
- Awoodaha ciidmadda Maryakanka iyo kuwa shisheeyaha
- Saraakiisha Dowladda sida loogu baahdo hawlo dowlad oo khaas ah sida ammaanka qaranka.
- Hay'ado dad-weyne ama khaas ah (sida FEMA ama Laan-qayrta Cas ee Mareykanka) kuwaasoo sharciyan loo ogolaaday inay wax ka caawiyaan dadaalada gargaarka masiibooyinka

## Isticmaalo iyo bandhigyo u baahda oggolaanshahaaga

Waxaan ka ahayn isticmaalada iyo bandhigyada ogeysiiskaan ku qoran, ma isticmaali doono ama ma wadaagi doono macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka ogolaanshahaaga qoraalkaa la'aantiis. Haddii aad na siiso oggolaansho qoraal ah, waxaan nasakhi karnaa oggolaanshahaas markasta illaa:

- Aan u baahano bandhigga si aan ku helno lacagta adeegyo aad horay u heshay.
- Aan horay ugu tiirsanayn oggolaanshaha.
- Sharcigu kaa mamnuuco nasakhiddiisa.

Xaaladaha qaarkood, sharcigu wuxuu siiyaa ilaalooyin khaas ah noocyo gaara ee macluumaad caafimaad bukaan sida kuwa diiwaanada maandooriyaasha iyo alkoholada iyo diiwaanada caafimaadka xiska. Markii sharciyan loo baahdo, waan ku la soo xiriiri doonaa si aan u helno oggolaansho qoraal ah ee si loo isticmaalo ama loo bandhigo macluumaadkaas.

Waa inaan helnaa oggolaanshahaaga hore kahor inta anaan isticmaalin ama muujinin macluumaadkaaga caafimaad bukaan looguna talagalay ujeedooyin suuqayn ama kahor inta anaan iibin.

## Waqtiyada aad naga codsan kartid in aanaan wadaagin macluuumaadkaaga caafimaadka bukaanka

### Diiwaan-qorka Bukaan-jiifka Isbitaalka

Haddii lagu geliyo isbitaalka, waxaan kugu qornaa buuga-diiwaan-gelinta. Macluumaadkaan waxaa qura oo ku jira magaca, meesha isbitaalka iyo xaaladda caafimaad ee guud (tusaale, "fiican," "halis," "xun"). Illaa aad noo sheegto in aanaan sheegin, waxaa dhici karta in aan siinno macluumaadkaan booqayaasha ama wacayaasha kuwaasoo nagu kaa waydiiya magac ahaan. Waxaa dooran kartaa in aad ku qortid diinta qoyskaaga foomka isbitaal-gelinta. Haddii aad saas sameysid, waxaan siin karnaa magacaaga iyo meeshaada wadaad diintaada.

Waqtiyada markaa naga codsan kartid in aanaan wadaagin macluuumaadkaaga caafimaadka bukaanka:

- Diiwaan-qorka Bukaan-jiifka Isbitaalka
- U-bandhigis Qoys, saaxiibo ama cidkale

### U-bandhigis qoys, saaxiibbo ama cid kale

Illaa aad noo sheegto in aanaan sheegin, adeeg-bixiyaashaada daryeel-caafimaadka waxay isticmaali doonaan go'aankooda khibradeed si ay macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka u siiyaan xubin qoys, saaxiib ama qof kale oo aad magacawdo.

# Adeeg-bixiyaal kale oo ku jira Ogeysiiskan

## Seattle Cancer Care Alliance (SCCA) (Iskutaga Daryeelka Kansarka ee Seattle)

SCCA waxay la shaqeysaa Childiren's, Dhaqaatiirka Jaamacadda iyo Rugta Baaritaanada Kansarka Fred Hutchinson si ay daryeel kansar u siiyaan bukaan-jiifka iyo bukaan-socodkaba. Macluumaadka caafimaadka bukaanka waxaa la la wadaagaa hay'adahaan markey u habboon tahay daaweeyn, kharash-adeeg iyo adeegyo daryeel caafimaad oo wadar ah. Ogeysiiskaan wuxuu khuseeyaa isticmaalka iyo bandhigga macluumaadkaaga markey SCCA daaweeyn ka bixiso Children's. Sifeynta hab- dhaqannada asturnaanta ee SCCA, kuwaasoo khuseeya dhammaan dhaqdhaqaaqyada kale ee SCCA, fadlan ka eeg Ogeysiiskeeda Hab-dhaqannada Asturnaanta.

## Jaamacadda UW (UW Medicine iyo UW School of Dentistry [UW SOD])

Dhaqaatiirta UW iyo UW SOD, oo ay ku jiraan dhaqaatiirta jaamacadda, dhaqaatiirta ilkaha iyo adeeg-bixiyaal daryeel caafimaad oo kale, waxay bixiyaan ama ka qaybqaataan adeegyo daryeel caafimaad oo lagu qabto Children's. Macluumaadka caafimaadka bukaanka waxaa la la wadaagaa Children's iyo hay'adahaan markey u habboon tahay daaweeyn, lacag-bixin iyo adeegyo daryeel caafimaad oo wadar ah sida dib-u-eegis saaxiibeed iyo dhaqdhaqaaqyo hormarinta tayada, dhaqdhaqaaqyo aqoonsiyada shati iyo qiimayn la-tababbarayaal.

## Children's University Medical Group (CUMG) (Kooxda Caafimaadka Jaamacadda Isbitaalka Carruurta)

Dhaqaatiirta Jaamacadda ee Iskuulka Caafimaadka ee WA kuwaasoo la shaqeeya CUMG, adeeg-bixiyaal daryeel caafimaad oo faa'iido sameyn, waxay bixiyaan ama ka qaybqaataan adeegyo daryeel caafimaad oo lagu qabto Children's. Macluumaadka caafimaadka bukaanka waxaa lagu dhex-wadaagaa Children's iyo CUMG markey u habboon tahay daaweeyn, lacag-bixin iyo hawlgallo daryeel caafimaad oo wadar iyo khaas ah. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah sameeynta qiimayn tayo iyo dhaqdhaqaaqyo hormarin; dib-u-fiirinta fahanka ama aqoonta xirfadleyda daryeelka caafimaadka; abuuridda barnaamijta hogaansanaanta; iyo ka qaybqaadasho dhaqdhaqaaqyo qorsheyn ganacsi, hormarinta, maamulka iyo nidaamka guud.

## Kala takoorka ayaa sharciga ka soo horjeeda

Seattle Children's ayaa u hoggaansan sharciyada federaalka iyo kuwa kalee madaniga ah ee khuseeya arrinta oo aan ku kala takoorin, aan ku kala soo soocin oo aan ula dhaqmin si duwan dadka iyada oo ku saleysan isir, midab, diin (caqiido), jinsi, isku aqoonsi ama muujin lab ama dheddig ahaan, u jeed jinsi, asal qowmiyad (abtirsiin), da', naafanimo, ama heer kale oo ay dhowraan sharciyada federalka, gobolka ama deegaanka ee arrinta khuseeya.

## Gargaaro iyo adeegyo bilaash ah oo loogu talagalay dadka naafanimada qaba

Seattle Children's ayaa bixisa waxyaabahan gargaar ah iyo adeegyadan lacag la'aan ah si looga caawiyo dadka naafada ah, matalan bukaanka iyo daryeel-bixiyeyaasha ah, inay si wax ku ool leh noola soo xiriiraan annaga:

- Turjumaanada luqadda calaamadda oo xirfad sharciyaysan leh
- Macluumaad qoran oo qaabab kale ah (tus., daabac far waawayn, maqal, qaabab elektaroonig oo marin u hel leh)

## Adeegyo Luqado lacag la'aan ah

Seattle Children's ayaa siisa adeegyadan luqadda lacag la'aan dadka, oo ay ka mid yihiin bukaannada iyo daryeel-bixiyeyaasha, aanay luqaddooda hore ahayn Ingiriisi:

- Turjumaanno xirfad sharciyaysan leh
- Macluumaad ku qoran luqado kale

Haddii aad u baahan tahay adeegyadan, u sheeg qofka adiga ku caawinaya inaad u baahan tahay gargaar, ama kala xiriir Xarunta Ilaha Qoyska telefoonka 206-987-2201.

## Cabashooyin?

**Xiriiryada Bukaanka iyo Qoyska Seattle Children's**

Haddii aad aamminsan tahay inay Seattle Children's ka gaabisay inay bixiyaan adeegyadan ama kugu takooreen si kasta ha ahaatee, waxaad xerayn kartaa cabasho rasmi ah (wax ka sheegasho) Xiriiryada Bukaanka iyo Qoyska:

- Telefoonka/Turjumaanka: 206-987-2550 ama 1-866-987-2000 (lacag-la'aan). Markaad rabto turjumaan, wac 1-866-583-1527 oo weyddiiso turjumaanka in uu kugu xiro 206-987-2550.
- Onlayn: www.seattlechildrens.org/familyfeedback
- Iimayl: family.feedback@seattlechildrens.org

- Boostada: Seattle Children's Hospital
  M/S RB.7.420
  PO Box 5371
  Seattle, WA 98145-5005

  Haddii aad u baahan tahay inaad xerayso cabasho rasmi ah (wax ka sheegasho), ka wac Xiriiryada Bukaanka iyo Qoyska lambarka korka ku yaal oo qof ayaa ku caawin doona.

## AMA

**Waaxda Dawladda Maraykanka ee Adeegyada Caafimaadka iyo Aadamiga, Xafiiska Xuquuqda Madaniga**

Waxa kale oo aad ku xerayn kartaa cabashada xuquuqda madaniga Waaxda Dawladda Maraykanka ee Adeegyada Caafimaadka iyo Aadamiga, Xafiiska Xuquuqda Madaniga:

- Onlayn: https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf
- Telefoon: 1-800-368-1019 | 1-800-537-7697 (TDD)
- Boostada (Foomamka cabashada waxa laga heli karaa www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html):

  Centralized Case Management Operations
  U.S. Department of Health and Human Services
  200 Independence Avenue SW
  Room 509F HHH Bldg.
  Washington, D.C. 20201



**If you do not speak English, or if you are Deaf, hard of hearing or Deaf/blind, we will provide interpretation services for you at no charge. Tell the person helping you that you need an interpreter or call the Family Resource Center at 206-987-2201.**

Haddii aadan ku hadlin ingiriisiga, ama haddii aad dhagoole tahay, maqalku kugo adag yahay, ama dhagoole/indhoole tahay, waxaad heli kartaa in laguu turjumaano adiga oon wax lacag ah bixiin. U sheeg qofka ku caawinaya in aad u baahan tahay turjumaan ama wac 206-987-2201 xarunta khayraadka qoska.

## Si aad u isticmaasho xuquuqdaada asturnaanta ama aad cabasho u sameyso, waxaad la xiriiri kartaa:

**Children's Privacy Office**
Mailstop RC-402
PO Box 5371
Seattle, WA 98145-5005

206-987-1200
1-866-987-2000, ext. 7-1200 (Telefoon lacag la'aan ah)
privacy.questions@seattlechildrens.org

## Haddii aad cabasho qabtid, sidoo kale waxaad la xiriir kartaa:

**Office for Civil Rights, Region X (Oficina de Derechos Civiles)**
U.S. Department of Health and Human Services (Departamento de Salud y Recursos Humanos)
Mailstop RX-11
2201 Sixth Avenue
Seattle, WA 98121-1831

206-615-2290
206-615-2296 (Dhega la' ama dhega-culus)
206-615-2297 (Faksi)
1-800-362-1710 (Telefoon lacag la'aan ah)
1-800-537-7697 (Dhega la' ama dhega-culus)

### Adeegyo Turjumaad Lacag la'aan ah

- Markaad joogto isbitaalka, weyddii kalkaaliyaha caafimaad ee ilmahaaga.
- Markaad joogto waxa ka baxan isbitaalka, u soo wac khadka turjumaad qoyska ee lacag la'aanta ah. 1-866-583-1527. U sheeg tujumaanka magaca iyo khadka gaarka ah ee aad rabto.

Seattle Children's®
HOSPITAL • RESEARCH • FOUNDATION

4800 Sand Point Way NE
PO Box 5371
Seattle, WA 98145-5005

206-987-2000
1-866-987-2000 (Telefoon lacag la'aan oo isticmaalka ganacsi keliya loogu talagalay)

1-866-583-1527 (Khadka turjumaanka qoyska)
www.seattlechildrens.org

Waxaan xaq u leenahay in aan beddelno hab-dhaqannada asturnaanta ee ogeysiiskaan ku jira iyo xaqqa aan ku sameyno beddelladaan loogu talagay macluumaadkaaga caafimaadka bukaanka ee hadda iyo mustaqbalkaba. Waxaan ogeysiiska hadda jira ku dhejinaa meelaha Children's. Waxaad ka codsan kartaa nuqul meelkasta oo Children's, sida Xarunta Kheyraadka Qoyska ama bartanada internetka (www.seattlechildrens.org).

Children's wuxuu macluumaadkaan ku bandhigi doonaa qaabab u dhigma markii la codsado. Ka wac Xarunta Kheyraadka Qoyska: 206-987-2201.

© 2018 Seattle Children's, Seattle, Washington. Derechos reservados.

1/18
PI397SO